

Amiibaha *Naegleria fowleri* iyo Caabuqa Daran ee Maskaxda ee Amiibaha

Waa maxay Amiibaha *Naegleria fowleri* iyo Caabuqa Daran ee Maskaxda ee Amiibaha?

Naegleria (nigh-GLEER-E-uh) waa amiiba caadi ahaan laga helo biyaha diiran ee macaan iyo ciidda. Kaliya hal nooc oo *Naegleria* ah ayaa dadka cudur ku rida, Amiibaha *Naegleria fowleri*. Wuxuu keenaa infekshan maskaxeed oo naadir ah balse aad u daran oo loo yaqaano (PAM), Caabuqa Daran ee Maskaxda ee Amiibaha kaasoo inta badan dilaa ah.

Sidee qofku u qaadi karaa cudurka?

Amiibaha *Naegleria fowleri* ayaa dadka ku dhaca markuu jirka ka galo sanko. Amiibaha ayaa sanko kor ugu socda ilaa maskaxda uu ka tago halkaasoo uu burburiyo nudaha maskaxda. Guud ahaan, tani waxay dhacdaa marka dadku ay ku dabaashaan ama quusaan biyo diirran oo macaan, sida harooyinka/waraha ama webiyida.

Marar dhif ah, ayay caabuqyada soo sheegeen dad markay ku nadiifiyaan sanqadooda biyaha ka socda tuubbada ee uu wasakheeyay amiibaha *Naegleria fowleri*. Ma qaadi kartid marka aad cabto biyo wasakhaysan ama aad ku dabaalato barkad dabaasha oo si fiican loo nadiifiyay, loo dayactiray, oo loo jeermis-dilay. PAM laguma kala qaadi karo qof-ka-qof.

Astaamahee lagu gartaa?

Astaamaha PAM waxay badanaa bilawdaan qiyaastii 5 maalmood kadib caabuqa. Astaamuhu waxay noqon karaan kuwo khafiif ah marka hore, balse si dhakhso ah ayay uga sii dari karaan. Marka lagu jiro wejiga hore, astaamaha ayaa waxaa ka mid noqon kara:

- madax-xanuun
- qandho
- lallabo
- matagid

Astaamaha dambe ayaa waxaa ka mid noqon kara:

- qoor-xanuun
- wareer
- danayn la'aanta dadka iyo agagaarka
- dheelitirnaan la'aan
- suuxdimoo/qabatino
- dhalanteedyo

Kadib marka astaamuhu bilawdaan, cudurka ayaa si dhakhso ah uga dari kara wuxuuna sababi karaa dhimasho muddo 5 maalmood gudahooda.

Dadku waa inay isla markiiba raadsadaan daryeel caafimaad mar kasta oo ay ku dhacdo qandho lama filaan ah, madax-xanuun, qoor-xanuun, iyo matagid - gaar ahaan haddii ay galeen biyo diirran oo macaan labadii toddobaad ee la soo dhaafay.

Halkee iyo goorma ayay u badan tahay in la helo?

Amiibaha *Naegleria fowleri* waxaa laga helaa dunida oo dhan, inta badan waxaa laga helaa biyaha diiran ama kulul ee macaan (harooyinka, webiyada, iyo biyo kululeyaasha). Waxaa sida caadiga ah laga helaa harooyinka/waraha ku yaala gobolada koonfurta, balse wuxuu ku keenay caabuqyo gobollo badan oo waqooyiga ku yaala, oo ay ku jirto Minnesota. Amiibaha wuxuu si fiican ugu koraa biyo diirran ama kulul.

Iyadoo caabuqyada lala xiriiro amiibaha *Naegleria fowleri* ay naadir yihiin, waxay inta badan dhacaan bilaha xagaaga ah ee Luulyo, Agoosto, iyo Sitembar. Caabuqyada waxay caadiyan dhacaan marka cimiladu kulul yihiin muddo-dheer, taasoo sababta in heerkulka biyuhu aad u sarreeyaan oo mugga biyuhu aad u hooseyaan. Caabuqyadu way kordhi karaan inta lagu gudajiro sannadaha ay jiraan mawjadaha kulaylka. Wuxuu si fiican ugu koraan heerkul aad u sarreeya (ilaa 115°F) iyo marka ay cimiladu kulul yihiin muddo-dheer. Wuxuu ku noolaan karaa muddo gaaban heerkulka aad u sarreeya. Uma badna in laga helo biyaha marka heerkulku hoos u dhaco.

Sidee ku ogaan kartaa in harada/warta ay leedahay amiibahan?

Nasiib darro, ma jiro baaritaan degdeg ah, oo heersare ah oo lagu ogaan karo amiibaha *Naegleria fowleri* ee ku jira biyaha. Icticmaalayaasha biyaha madadaalada waa inay u qaataan in amiibaha *Naegleria fowleri* uu ku jiro biyaha diiran ee macaan iyo inay had iyo jeer jiri doonto halis hooseyso oo cudur marka la gelo biyahaan. Xaddidaadda inta ay le'eg yihiin biyaha sankaaaga kor u gelaya iyo raacitaanka talooyinka kahortagga ayaa kaa caawin doonaan dhimista halista aad ugu jirto.

Sideed uga hortagi kartaa?

Sida kaliya ee la hubo ee looga hortagi karo PAM waa in laga fogaado kaqaybqaadashada hawlaha la xiriira biyaha macaan. Waad dhimi kartaa halista aad ugu jirto PAM adigoo xaddidaya xaddiga biyaha ee sanqadaada galaya. Markaad ka qaybqaadanayso hawlaha la xiriira biyaha dhulka ee diiran ee macaanka ah:

- Iska ilaali biyaha diiran ee macaanka ah marka heerkulka biyuhu sarreeyo oo heerka biyuhu hooseeyo.
- Iska ilaali inaad madaxaaga geliso biyaha.
- Qabso sankaaaga ama isticmaal biinanka sankaa.
- Iska ilaali inaad qodo ama kiciso wasakhda.

Haddii aad samaynayso xal aad ku nadiifinayso ama ku biyo raacinayso sanqaroorakaaga, isticmaal biyo ammaan ah si aad naftaada u ilaalisoo:

- Karkari biyaha ilaa 1 daqiiqo oo qabooji, ama
- Sifee biyaha adigoo isticmaalaya shaandheeye loogu talagalay in biyaha looga saaro jeermiska biyaha jecel; cabbirka shabaqa ee laasimka ah waa inuu noqdaa 1 mayroon ama ka yar, ama
- Soo iibso oo isticmaal oo keliya biyo lagu calaamadiyey in la miiray ama nadiif yihiin.
- Ku biyo-raaci qalab walba biyo ammaan ah kadib markaad isticmaasho oo qalabku si buuxda ha u engego/qallalo.

3/2018 (Somali)

Si aad macluumaadkan ugu hesho qaabab kale, wac: 651-201-5414. Waxaa lagu daabacay warqad dib loo warshadeeyey.